



(Waar hooy ma idiin sheegaa dambiyada kuwa ugu waawayn:?)

Abii bakrata-Allaha ka raali ahaade wuxuu yiri: Nabigu scw wuxuu yiri: (Waar hooy ma idiin sheegaa dambiyada kuwa ugu waawayn:?) saddex jeer, waxay dheheen: haa Rasuul Ilaahayow, wuxuu yiri: (waa: Ilaahay oo loo shariig yeelo iyo waalid caasiga) wuuna soo fariistay isagoo xusulku u mudan yahay, wuxuu yiri: (waar hooy iyo markhaati beenaalaha), wuxuu yiri: kama uuna daalin inuu ku celceliyo ereygaa, ilaa aan iri: muu iska aamuso.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu u sheegay asaxaabtiisa dambiyada ugu waawayn, saddexdan buuna sheegay: 1aad. Ilaahay oo loo shariig yeelo: waana nooc walba oo cibaadada ka mida oo loo leexiyo cidaan Ilaahay ahayn, iyo Ilaahay Ilaahnimadiisa, Rabinimadiisa, Magacyadiisa iyo sifaadkiisa oo cid kale lalasimo. 2aad. Waalid caasiga: waana dayac iyo hagar daamo kasta oo labada waalid loogaysto, hadal iyo ficilba kuu doono ha ahaadee, iyo samafalkooda oo lala imaan waayo. 3aad. Been abuurka oo markhaati beenaaluhuna soo galayo: waana hadal kasta oo been abuura loogana jeedo in lagu duudsiiyo qof, kaasoo lagu banaysanayo maalkiisa, laguna xad gudbo cirdigiisa iyo wixii la mida. Nabigu scw wuu ku celceliyey ka digida hadalka been abuurka ah, isagoo ku baraarujinaya dadka xumaantiisa iyo saamayntiisa xun ee bulshada uu u leeyahay, ilaa ay dheheen asaxaabtu: muu iska aamuso, iyagoo u naxariisanaya Nabiga scw, oo nacaya wixii isaga dhibaya.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/2941>

